



Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliiska Minneapolis

Tirada:
9-100

Majallada 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

Xarigyada Dadka Waaweyn

9-114 Maamulka Booliska ee Arrimaha Socdaalka

(05/29/02) (04/02/18)

- A. Xeerka Maraykanka, 8 U.S.C. §1101, waxuu awood siinayaa Adeegga Socdaalka iyo Jinsiyadaha Mareykanka (USCIS) iyo Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastamyada (ICE), Waaxda Amniga Gudaha, inay yihiin awoodda kaliya ee arrimaha socdaalka.
- B. MPD waxay si wada jir ah ula shaqeysaa dhammaan hay'adaha federaalka, laakiin MPD kama shaqeyso barnaamijyadeeda ujeedadoodu lagu xoojinayo sharciyada socdaalka federaalka. Intaa waxaa dheer, Sharciga Magaalada Minneapolis §19.30 wuxuu mamnuucayaa fulinta "tallaabo kasta oo sharci-fulin ah oo ujeedadeedu tahay ogaanshaha joogitaanka dadka aan sharciyaysneyn, ama si loo xaqiijiyo xaaladda socdaalka," marka laga reebo fulinta sharciga dembiyada sida kuwa la xiriira ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta halkaas oo sharciga socdaalka noqonayo qayb ka mid ah dembiga.
- C. Saraakiishu waa in aanay qaadin wax tallaabo ah oo dhaqangelin ah oo ujeedadu tahay in lagu ogaado joogitaanka dadka aan sharciga lahayn, ama si loo xaqiijiyo xaaladda socdaalka, oo ay ku jirto laakiin aan ku xaddidnayn in qofna laga weydiyo xaaladdiisa socdaalka.
 1. Waxa **kaliya ee ka reeban** mamnuuciddan waa marka sharciga socdaalka uu yahay shay dembi. Tani waa ka reebis aad u xaddidan oo waxay quseysaa kaliya noocyada dembiyada federaalka ee laga mamnuucay 8 U.S.C. §1324, ee la xidhiidha dembiyada ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta.
 2. Marka su'aalo la weydiinayo, la xirayo, ama la haynayo qof kasta oo ka reeban kan, sarkaalku waa inuu caddeeyaa oo uu diiwaangeliyaa sababta uu sarkaalku u aaminsan yahay in xaaladda gaarka ah qusayso.
- D. Saraakiishu waxay qaadan doonaan warbixinnada kaadhahka aqoonsiga maqan, lumay ama la xaday ee muwaadiniinta ajnabiga ah si waafaqsan Siyaasadaha P&P 4-600 iyo Habka Warbixinta Gaarka ah.